

## SHAY QIIMO LEH

U sameeya ardayda maalin ama todobaad ay ardayda dugsiga keensanayaan shay qiimo gaar ah ugu fadhiya ama sawirka shaygaas. Waxaad qiyaasi kartaan, dadka shayaashaas iska leh.

Arday kasta wuxuu ka hadlayaa shayga iyo sababtuu uu isaga muhiim ugu yahay. Waxaad sidoo kale shayga laga qaadi karaa sawirada awooda.



## HAL SAAC KU BARTA LUQAD CUSUB BIL KASTA SALAANTA BILLOWGA AH

Dhammaadka sannad-dugsiyeeka marka la gaaro ardayda oo dhan waxay toban luqadeed oo cusub ku barten salaanta.




## LUQADO KALA GEDISAN KU SAAMEEYA TABELLOOYINKA DUGSIGA



## CIYAARTA SAWIR KABKABKA EE AQOONSIGA QOFKA

La sameeya kooxda ciyaarta sawir kabkabka ee aqoonsiga qofka. Ka fekera, waxa qof kasta shakhsi ka dhigaya.



## XAFLAD

Layliskan wuxuu ku fiicanyahay in lagu kiciyo mdowduuca laga baaraandegayo iyo arrinta ah, waxa ay ardayda ka yaqaanaan. Layliskan waxaa la isticmaali karaa, marka lagu soo celinayo mowduuca la bartay.

Mowduuca laga hadlayo waxaa laga sameynayaa su'aalo tiradoodu la mid ah tahay tirada ardayda fasalka joogta. Ardayda waxaa loo qaybinayaa warqadaha ay su'aaluhu ku qoranyihiin, markaas kaddibna waxaa la shidayaa muusiga.


Muusiga oo shidan ayeey ardaydu fasalka ku dhex soconayaan. Marka muusiga la joojiyo ayeey ardaydu qof labaad raadsanayaan. Labada lamaane waxay si kaltan ah isu weydiinayaan su'aalaha waxayna wadajir uga fekerayaan jawaabaha su'aalaha.

Ugu dambeyn ardaydu su'aalo ay iyagu mowduuca ka hindiseen ayeey isweydiin karaan.




## LUQADAHEE AYAA FASALKA LOOGA HADLAA?

Boostar ka sameeya luqadaha ay kooxda ku hadasho, kaas oo ay ardaygu noociisa dooranayaan. Boostarku wuxuu noqon karaa tusaale ahaan waddo luqadeed, derbi luqadeed, geed luqadeed ama cir luqadeed. Boostarka soo bandhiga.



## MAALINTA LUQADAHA YURUB WAXAA LA XUSAA 26.9.



Ardayda iyo shaqaalaha la sameeya muddo todobaad ah ogeysiisyo ku baxaya luqado kala duduwan. Marka uu ogeysiisku dhaco, kala feker kooxda, luqada lagu hadlayay waxa ay aheyd.

Cid fahamtay miyaad jirta, waxa ogeysiiska lagu sheegay?  
Ogeysiisyadu waxay noqon karaan farriimo caadi ah oo hawlmaalmeedka dugsiga la xiriira.

## IMISA LUQADOOD AYAA LOOGA HADLAA DUGSIGIINA?

Ku dara bogga internetka ee dugsigiina ama kanaal farriimeedka kale macluumaad ku saabsan, tirada luqadaha dugsigiina looga hadlo. Macluumaadku wuxuu noqon karaa qoraal, fiidiyow ama linki.



## WEEDH XIKMAD LEH


Ka doorta buugaagta maadooyinka, buugaagta aqoonta ama internetka jumlad, taas oo la xirirta mowduuca la baranayo. Ka sheekeysta jumlada, waxyaabaha ku jira iyo luqadda, 15–20 daqiiqo. Wadahadalka waxaa laga bilaabi karaa su'aasha: Maxaad jumlada ku aragtaa?

Tukaha cunto kasta cuna wuxuu haystaa fursado uu jiilaalka uga samatabaxo oo ka wanaagsan kuwa ay haystaan shimbir kale oo badan oo deegaanka ah.

## KURAASTA DUGSIGA

Koontaroola kuraasta dhismaha dugsiga. Kuraas noocee ah ayaa yaala goobaha kala duwan shaqaaluhuna ay kala haystaan? Kuraasta ugu badan halkee ayeey yaalaan, halkee ayaanay kuraasi aalin? Waa maxay cabirka iyo sida ay u eg'yihiin kuraasta ay dadka kala gedisan haystaan?

Waxaad sidoo kale baartaan, nooci ay ahaayeen kuraasti dugsiyada taalay waagi hore iyo noocyada kuraasta ee yaal dugsiyada dalka dibaddiisa ku yaal. Sidee ayeey u eg'yihiin kuraasta dugsiga mustaqbalku?




## SAF AFKA SHEEKAYSANAYA

11

Labo saf isu habeeya, si qof kasta uu qof kale oo labaad ugu beegnaado. Wadahadalka waxaa lagu baran karaa tusaale ahaan sida looga wadahadlo ama looga doodo, maxaan maanta bartay – fursaduhu xad ma lahan.

Waxaa qofka labaad lala sheekaysanaa illaa iyo inta laga gaarayo baaqa macallinka, markaas oo ay labada qofood isbeddelayaan. Hal saf meeshiisa ayuu ku negaanayaa marka uu safka kale dhaqaaqayo. Qofka safka ugu dambeeya ayaa billowga safka u wareegaya.



DIVED

buukal gillii ja kultuurii • sukella kieleen ja kulttuurin • dyk i diversitet

## 6.11. WAXAA LA XUSAA MAALINTA ISWIIDHISHNIMDA

12

Fasalka la dhegeysta Modersmålet sång kaddibna ku wareegga dugsiga iyo deegaannada u dhow. Maxaad hesheen oo luqada iswiidhishka ku qoran?



DIVED

buukal gillii ja kultuurii • sukella kieleen ja kulttuurin • dyk i diversitet

## XUSUUSQORKA SAWIRKA EE LAHJADAHA IYO LUQADAHA

Kooxda kala samee luqadaha iyo lahjadaha maalintaas la isticmaalay xusuusqor. Waxaa la sawiri karaa xaaladaha isticmaalidda luqadda ee kala gedisan, tusaale ahaan farriin dirista. Qusuusqorka sawirka ah waxaa ka sokow sawirka lagu qorayaa warbixin ku saabsan, xaaladda isticmaalidda luqada ee sawirka ku jirta nooca ay tahay.


Sawirada isugu geeya xusuusqorka sawirka wadajirka ah ee fasalka ee dijitaalka ah.



## KAARTADA FIKRADDA

Ardayda la barta sameynta kaartada firkadda.

Ardaydu waxay kooxaha dhexdooda ka dooranayaan, mowduuca ay kaartada fikradda ka sameynayaan. Marka uu qofku mowduuca dooran karo, barashadu waa mid niyad loo hayo. Kaartada fikradda sawir ahaan ayaa loo nooleyn karaa.



## JAMAL BARAFEEDKA DHAQANKA


Kooxda kala sheekeysta dhaqamada iyadoo la kaalmaysanayo sawirka jamal barafeedka. Waa maxay arrimaha muuqda ee dhaqamada ku jira?

Marka aad liis ku qortaan arrimaha muuqda ee dhaqamada, ka hadla qaybaha aan muuqan ee dhaqanka, kuwaas oo la xiriira qaybaha muuqda ee dhaqanka. Qaybaha dhaqanka ee aan muuqan waa tusaale ahaan sharafta, aragtiyada iyo caado dhaqameedyada.



## LA BARTA KOOXDA ASTAAN HADALKA

Haddii tusaale ahaan la raadiyo “billowga luqada dhegoolaha” waxaa la helayaa tilmaamo.



Miyaad garan kartaa, waxa astaan hadal loola jeedo?



## KOOXDAADA DIBADDA ULA DIR KAARARKA BOOSTADA

www.postcrossing.com



## MASHRUUCA XUDUUDAHA KA BAXSAN

Kooxda la sameeya mashruuca ka baxsan xadadka maaddooyinka. Mashruucu wuxuu noqon karaa tusaale ahaan ururinta buugga cunto karinta ee luqadaha iyo dhaqamada badan, sameynta fiidiyowga bandhigga dugsiga ama fasalka ee luqadaha badan ama laxan saaridda hees luqado badan iyo qoob ka ciyaarka.




## TUSAALAJA FRAYER

Tusaalaha barashada erayadu wuxuu ku shaqeeyaa maaddo kasta. Ardaydu waxay wadajir u buuxinayaan tusaalaha oo elegtoroonig ama buug wax lagu qoro.



Ardayda waxay erayo iyaga ku cusub ka raadinayaan mowduuca la doortay waxayna erayadaas u raadinayaan sharraxaad, macna-wadaag, waxay allifayaan jumlad uu eraygo ku habboonyahay ama waxay sawirayaan sawir. Ardayda kooxda ku jirta waxay kala qaabilsanaan karaan hawlo kala duwan. Ardayda waxaa loo kala qaybqin karaa kooxo luqadda baara, kuwaas oo ay hawshoodu tahay in ay maalin kasta tusaalaha ku daraan 2-5 eray oo cusub. Kedis ayaa dhammaadka todobaadka laga sameyn karaa.



## DHAQAMADA DUNIDA

Ardayda kala fekera, waxyaabaha ay dhaqamada kala duwan wadaagaan, yacni caamka ah. Markaas kaddib ka fekera, in waxyaabaha ay wadaagaan uu xittaa farqi ku jiro.

Tusaale ahaan salaamiddu waa wax caam ah, laakiin dhaqamadu waa ku kala duwan yihiin qaababka salaanta. Qaababka salaantu xittaa waa ku kala duwan yihiin dhaqamada dhexdooda.




## RAADI QOF LABAAD

Marka lagu jiri layliska raadi qof labaad waa in la raadiyaa qof labaad oo heysta warqad ku habboon warqaddaada. Laylisku wuxuu ku habboonyahay barashada luqada iyo dulucda.

Tusaale:

1. Samee warqado ay ku qoran yihiin su'aalo iyo jawaabo ku saabsan mowduuca xiisadda lagu qaatay.
2. Qayb fasalka ka mid ah u qaybi warqadaha su'aalaha qaybta kalana u qaybi warqadaha jawaabaha.
3. Ardaydu waa in iyagoo socda ama isla sheekeysanaya ay helaan jawaab su'aasha ku habboon ama su'aal jawaabta ku habboon.
4. Marka ay ardaydu helaan qof labaad, waxay qprayaan su'aal cusub oo maowduuca ku saabsan.
5. Ardaydu waxay fasalka intiisa kale u akhrinayaan warqaddooda iyo su'aashooda cusub.
- 6 Taas beddelkeeda waxaa mar labaad la isku qasi karaa warqadaha waana in mar kale qof labaad la helo.



**DIVED**


buok'cal gillii ja kultuvrii • sukella kieleen ja kulttuurin • dyk i diversitet

## MAALINTA QARAN EE SAAMIYIINTA WAXAA LA XUSAA 6.2.

sanosesaameksi.yle.fi



**La xusa kooxdiina maalinta qaranka  
kaddibna barta luqada saami.**




Miyaad midabbayn kartaa calanka Saami?  
Goobta barka ah ee cas ee calanku waxay  
muujinaysaa qorrax goobta barka ah ee buluugguna  
waxay muujinaysaa dayaxa.

**DIVED**

buok'cal gillii ja kultuvrii • sukella kieleen ja kulttuurin • dyk i diversitet

## LUQADAHEE AYAAD GURIGAADA KA HESHAY?

Gurigaada ma ka heshay wax ka badan toba luqadood? Caddayn ahaan luqadaha aad heshay uga soo qaado sawir ama cod duuban.



## MAALINTA KALEVALA IYO DHAQANKA FINNISHKA WAXAA LA XUSAA 28.2.

Kooxdiiina kula aruuri sanduuqa dhaqanka alaabo la xiriira dhaqanka finnishka.

Ka sheekeysta sababta alaabahan ay u soo galeen sanduuqa dhaqanka. Sidee ayeey dhaqanka finnishka ula xiriiraan? Haddii aad doonaysaan alaabta sanduuqa dhaqanka ku jirta waxaad ka qabanqaabin kartaan bandhig ama fagaare dhaqameed oo uu dugsiga oo dhan ka qaybqaadan karo.




## ISBARBARDHIGGA ARRIMAHA – JAANTUSKA VENN

Jaantuska waxaa loo isticmaali karaa isbarbardhigga labo arrin, tusaale ahaan magaalo weyn iyo baaddiyaha, labada jilaa ee sheekada, labo luqadood ama shimbiraha hayaama iyo shimbiraha deegaanka.




Iyadoo jaantuska la kaalmaysanayo ayaa waxaa la muujin karaa farqiga iyo waxyaaha ay arrimuhu isaga mid yihiin. Jaantuska waxaa sidoo kale laga sameyn karaa boostar lagu dhejiyo derbiga fasalka.



## MA KU HADASHAA FUTI AMA RUBY?

Ka sameeya warbixin kooban luqadaha kala duwan ee kooxda laga helo dad aqoon gaar ah u leh.



## MIYAAD OGEYD IN AAD MUDNAAN GAAR AH LEEDAHAY?

Wadajir u samee laylis, kaas oo kicinaya ka fekeridda awood iyo mudnaan gaar ah. Macallinka ayaa fasalka hortiisa dhigaya weelka qashinka arday kastana wuxuu siinayaa warqad isku kuusan. Hawshu waa in meesha aad joogto warqadda ka tuurto kuna riddo weelka qashinka.

Kuwa safka hore fadhiya ayaa haysta fursad ay warqadda ugu ridaan weelka qashinka oo ka fiican tan kuwa safka gadaale. Tuurmada waa ka soo suurrageeli kartaa safka dambe, laakiin waxay u baahantahay dadaal badan.

Laylisku wuxuu hordhac fiican u yahay wadahadalka ku saabsan awoodda iyo mudnaanta gaarka ah.




## BILLOWGA IYO DHAMMAADKA QAYBTA

Jaantuska ayaa la kaalmaysan karaa marka la billaabayo ka baaraandegista mowduuc cusub.



Mowduucyada XAFLADAHA (kaarka lambar 5) ee qaab hadal ah looga baaraandegay waxaa halkaanna looga baaraandegi karaa hab qoraal ah oo qotadheer. Waa sahlantahay in jaantuska dib loogu laabto, marka laga baaraandegayo mowduuc horay loo sii saadaaliyay.




Baayk oo waa kalluun

Waa maxaya sababta uu baayk u yahay kalluun?

## LUQAD CUSUB

Kooxo yaryar fasalka u qaybiya, koox kastana waxay horumarinaysaa luqad ay leedahay, taas oo aan aheyn luqad sax ah oo lagu hadlo.


Kooxuhu waxay duubayaan fiidiyow luqadda lagu isticmaalayo. Fiidiyowga wuxuu tusaale ahaan qof weydiin karaa jidka musqusha loo aado qof kalana waddada saxda ah ayuu ku hagayaa. Ugu dambeynta waxaa fasalka lala fiirsanayaa fiidiyowga waxaana laga fekerayaa waxa dhacay marki luqadda la isticmaalayay. Sideen u garan karnaa waxa dhacaya, haddii aan luqadda la fahmeyn?



## MAALINTA QARAN EE JIBSIGA WAXAA LA XUSAA 8.4.

Miyaad ogeyd in midabka buluugga ah ee calanka Jibsigu uu muujinayo cirka iyo qaddarinta ruuxaaniga ah iyo in kan cagaarka ahna uu muujinayo dhulka iyo qaddarinta adduunyada.

[www.romanit.fi](http://www.romanit.fi)




Kooxdiina la barta dhaqanka jibsigu adinkoo isticmaalaya tusaale ahaan raabka, kartuunka la daawado ma aluqadda.

## WAXBARIDDA LABA GEESOODKA AH

Doorta heesta la baranayo. Shaqada macallinku waa in uu tusaaleeyaa, sida heesta koowaad loo barayo kooxda kale. Heesta waxaa laga raadinayaa wax muhiim ah, su'aalo ayaa laga sameynayaa waxaana la soo gaabinayaa macluumaadka muhiimka ah.

Heesaha soo socda ayaa si ay u bartaan kooxaha loo qaybinayaa. Macallinka iyo ardayduba waxay marka hore si talantaali ah u baranayaan labadii heesba hal hees, laakiin marka dambe ayuu macallinku barayaa heesta billowga ah kooxuhuna waxay barayaan heesaha kale.



## DAAWADA WARARKA LUQADDA DHEGOOLAYAASHA

Maxaad ka barateen luqadda dhegoolayaasha markii aad warka la socoteen?





## DHAQAMADA DUGSIYADA

**Dugsiyada ku yaal wadamada kala duwan waxay leeyihiin dhaqamo iyo habraacyo kala duwan.**


Tusaale: Dugsigu ma leeyahay saacado bareeg? Wahtiyadee ayeey fasaxyadu soo kala galaan? Intee ayeey dhan yihiin maalin-dugsiyeedyadu? Labis-dugsiyeed miyaa la isticmaalaa? Kabaha bannaanka miyaa gudaha dugsiga lagu gashadaa? Sidee macallinka loola hadlaa? Intee ayeey dhan yihiin tirada laylisyada dugsiga laga bixiyo?

Ka salgaara, noocyada habraac ee dugsiyada dalalka kala duwan kaddiba ka sheekeysta. Haddii aad doonaysaan waxaad hal maalin-dugsiyeed ku dhaqmi kartaan habdhaqanka dugsiga ee waddan kale.



## TAXANAHA SHEEKADA SAWIR-GACMEEDKA

**Ka sameeya cutubka la akhriyay taxane sheeko oo sawir-gacmeed ah.**



## BIIDSADA LUQADDA IYO DHAQANKA

Kala feker kooxda, nooca uu yahay layliska dijitaalka ah ee aad rabi lahaydeen in aad wadajir u sameysaan, taas oo la xiiirta luqada, dhaqanka ama labadaba.

Ablikeeshinnada dijitaalka ah, barnaamijyada ama asaasyada waxaa la isugu xiri karaa sida la rabo, laylis ahaanna waxaa loo isticmaali karaa sawir, cod, fiidiyow ama qoraal.

